Warbixin Kooban I: Shirkii Wadahadalka ee Buulo Burde
24 – 29 August 2018

“Xoojinta Faderaalka iyada oo loo maraayo qalalaasaha oo [nabad] lagu badalo: Dib u heshiisiin iyo, Dowlad Goboleedka Hirshabelle oo laga taageero dhexdhexaadinta bulshada”

Taariikh

Laga bilaabo 24–29 August 2018 waxay Hayàdda Berghof, iyadoo kaashaneysa Maamulka Dowlad Goboleedka Hirshabelle, Shirk ku qabatay magaalada Buulo Burde, Somalia. Shir dhaqameedkaas lixda maalmood socday, waxaa ka soo qeyb galay 50 ruux oo ka soo kala jeeda qabaailka iyoo beelaha kala duwan ee ku nool Gobolka, kuwaas oo matalaaya dhamaan qeybaha aay bulshada ka koobantahay sida dumarka, dhalinyarta, xirfadlayaasha, odayaal dhaqameedka, gabyaaga iyo culamaaùdiinka. Dadkaas waxay halkaas isugu yimaadeen in aay ka fakaraan khilaafka ragaadiyay bulshadooda iyo sidii khilaafkaas dhanka wanaaga loogu badali lahaa. Waxaa kale oo la weydiiyay in aay muujiyaan fikradahooda ku aadan laba hanaan ee ka socda xagga Dowladda dhexe – hanaanka qoridda iyo qaabeynta dib u heshiisiinta qaran iyo habka Federaaleynta. Kadib khudbad gaaban oo soo dhaweyn ah oo uu soo jeediyay Duqqa magaalada Buula Burde, Abdi Daahir Guure ayaa Shirka si rasmi ah u furay.

Aragtida Bulshada ee Khilaafka

Khilaafka oo faraha ka baxa iyo cawaaqibta uu bulshada ku leeyahay

Ka qeybgalayaasha Shirka waxay isku raaceen in khilaafka uu caadi ahaan ka bilowdo heer shakhsi oo u dhexeeya reeraha ama jiiraanka kuwaas oo ku murma arimo aay ka mid yihiin lahaansha dhul-beereed. Khilaafaadkaas ayaa waxay u gudbaan heer qabiil ilaa heer degmo, gobol ama xitaa heer wadanka oo idil ah ayada oo aay jiraan jilayaal si toos ah iyo si dadban khilaafka uga faaìdeystaan danahooda gaarka ah. Ka qeybgalayaasha waxay leeyihiin, jilayaashaan waxay noqon karaan ganacsato, siyaasiyiin [iyo] xitaa oday beeleed, kuwaas oo doonaaya dhaqaale ama awood siyaasadeed. Mar hadii is afgaranwaa uu u gudbo khilaaf beeleed iyo mid siyaasadeed, heerka qalalaasaha si degdeg ah ayuu faraha ugu bixi karaa taas oo aay xigeyso cawaaqib xumo oo waxaa lagu waayaa naf iyo maal. Dadku waxay si cad u sheegeen in khilaafka rabshadaha wata uu sabab u yahay horumar laànta ka jirta Degmada Buulo Burde. Sida uu yiri mid ka mid ah ka qeybgalayaasha, nolol aanan khilaaf lahayn “waxay horseedi lahayd farxad [iyo] anaga oo u hormarno sida dowladaha kale”.

Sababaha asaasiga ah ee Khilaafka

In kasta oo aay mararka qaarkood jilayaasha bilaabaan, asbaabta khilaafka waa mid qotto dheer oo ku saleysan habka awood qeybsiga qabaailka ayada oo dad badan aay u arkaan cadaalad darro, natiijadeeduna tahay dulli iyo burbur bulshadeed. Sababaha khilaafka asalka u ah ee aay ka qeybgalayaasha sheegeen waa arimo ku saabsan cadaalad iyo habka qeybsashada kheyraadka:

Kheyraadka iyo xuquuqda waxaa loo qeybiyaa si aan cadaalad ku dhisneyn, dadkuna waxaa loola dhaqmaa si kala duwan ayada oo loo eegaayo beesha aay ka soo jeedaan. Tani waxay horseedeysaa sadex nooc oo khilaaf ah oo aay ka qeybgalayaasha farta ku fiiqeen: (1) Khilaaf ku saleysan kheyraadka, sida qeybsashada kheyraadka oo aay ka mid yihiin dhul-daaqsinka iyo biyaha; (2) Khilaaf siyaasadeed oo ku saleysan awood qeybsi; iyo (3) qabiileysi ama qof jecleysi wakhtiyada qeybsiga gargaarka aay keenaan shesheeyaha oo aay Hayàdaha qeybinayaan.

Khilaafka ka jira Buulo Burde: Ballan-qaad weyn iyo dareen khiyaamo

Khilaafka siyaasadeed ee ugu weyn ee dhaliyay murunka ka jira Buulo Burde waxuu salka ku hayaa Caasimadda Dowlad Goboleedka. Markii gobollada Shabellada Dhexe iyo Hiiraan laisku daraayay, waxaa lagu ballamay in aay Buulo Burde noqoto Caasimadda Dowlad Goboleedka Hirshabelle. Si kastaba ha ahatee, markee Dowlad Goboleedka la sameyay dhamaadkii sanadkii 2016, Caasimaddii waxaa loo qoondeeyay magaalada Jowhar. Ka qeybgalayaasha waxay sheegeen in illaa iyo wakhtigaas aaysan jirin wax faahfaahin ama wada tashi ah oo lala yeeshay dadka reer Buulo Burde si looga dhaadhiciyo sababta Jowhar loogu doortay in aay noqoto caasimadda gobolka. Sidaa darteed, goàanka lagu gaaray magaalada noqoneysa caasimadda gobolka waa mid loo arkay cadaalad darro oo walwal ku abuuray dadka reer Buulo Burde ilaa heer aay ku fikaraan in aay gudbiyaan dacwad rasmi ah ayaga oo isla markaana ka baaraan dagaaya sidii aay mudaaharaad isugu soo bixi lahaayeen. Si loo yareeyo xiisadda arinkaan ku saabsan, waxay ka qeybgalayaasha Shir codsadeen in aay Dowladda Dhexe jawaab ka bixiso. Si arinkaan looga meel-gaara, waxay soo jeediyeen in maamulka Hirshabelle iyo odayaasha dhaqanka, ururada haweenka iyo dhalinyarta aay Shir isugu yimaadaan si khilaafka xal waara loogu hello.

Hababka xallinta khilaafaadka

Hadii dadku aay yihii kuwo dareensan masùuliyadda ka saaran bulshada aay ku noolyihiin oo aay yihiin kuwo u shaqeynaya danta guud, waxay door wanaagsan ka qaadan karaan xallinta khilaafka. Jilayaasha ugu muhiimsan ee loola jeeda waa odayaasha dhaqanka, culamaaudiinka, aqoonyahannada iyo ganacsatada. Jilayaasha dhaqan ahaan la dayacay sida dumarka iyo dalinyarta ayaa ayaguna si cad Shirka u tilmaamay ayada oo aay ka qeybgalayaasha sheegeen in aay yihiin afraad si weyn uga qeybqaadan kara ka hortagga iyo xallinta khilaafka.

Tobanaankii sano ee la soo dhaafay, dhex dhexaadinta ayaa waxay ahayd habka asaasiga ah ee khilaafka lagual tacaala. Tusaale ahaan, odayaasha dhaqanka ayaa inta badan loogu yeeraa in aay soo kala dhex galaan kuwa uu khilaafka ka dhaxeeya si aay isugu keenaan labada dhinac oo aay ugu dhiiro geliyaan xallinta khilaafkooda. Si guud ahaaneed, dadku waxay u arkaan in habkaan uu yahay mid lagu guuleystay hadii dhex dhexaadinta loo abbaaro si hufan. Hase yeeshee, ka qeybgalayaasha qaar waxay la tahay in hannaanka dhex dhexaadinta uusan ahayn mid mar kasta ku dhisan cadaalad maa daama dhex dhexaadiyayaasha [mararka qaar] loo soo xuli jiray si eex ku jirto. Daacadnimada dhex dhexaadiyayaasha waxaa mararka qaar raad ku yeelan kara kooxa dana gaar ah leh sida siyaasiyiinta iyo ganacsatada, iyo mararka qaar oo aay dhex dhexaadiyayaasha diiradda saarayaan danahooda khaaska ah ooo kali ah. Intaas waxaa sii dheer, ayada oo aan mar waliba sababta khilaafka dhalisay lagu falanqeynin hanka dhex dhexaadinta taas oo kordhiso fursadaha in uu khilaafka soo laabto. Ugu dambeyntii, habka dhex dhexaadinta wuxuu ku fashilmi karaa maa daama aaysan jirin awood

goàamadiisa fulineysa oo heshiisyada meel marineysa taas oo ah mid sida badan ka sareysa awoodda maamulka Hirshabelle.

Talooyin ka soo baxay bulshada oo ku saabsan hurumarinta nabad waarta

Iyadoo la eegayo wadahadaladii Shirka, ka qeybgalayaashu waxay soo koobeen talooyinka soo socda:

1. Waa in la qabtaa tababarro ku aadan xallinta khilaafaadka, kuwaas oo kaamilaaya habkii dhaqanka ee lagu xalin jiray khilaafaadka si loo gaaro heshiis nabadeed oo waaro.
2. Waa in la qabtaa Shirar wadahadal oo loo dhanyahay, si bulshadu aay fursad u hesho gaar ahaan in dumarka iyo dhalinyarta aay ku muujiyaan fikradahooda ku aadan khilaafka oo aay ka doodaan sababaha dhaliya ee khilaafka asalka u ah. Kulamadaan waxay horseedayaan fursado hurmarinaaya xiriirka bulshada taas oo qeexeesa hanaanka aay bulsha nabad ugu wada noolaaneyso.
3. Waa in la abaabulaa barnaamijya wacyi gelineed oo ku aadan doorka gaarka ah ee aay dumarku iyo dhalinyarta ku leeyihiin xallinta khilaafka iyo wacyi gelinta ku aadan xallinta khilaafka oo aay ku faafiyaan dhulka miyiga ah.

Aragtida Bulshada ee ku aadan Federaalka

Federaalku waxuu Buulo Burde ka yahay mawdhuuc xasaasi ah. Shirka waxuu xaqiijiyay macluumaadkii aay Hayàdda Berghof mashruucii hore ee ku saabsanaa Federaalka ka heshay ee ahaa in badankood dadka aay Federaalka ka soo horjeedaan. Si kastaba ha ahaatee, fikradaan xun ma aha mid ka timaaday diidmo Federaalka si ahaantiisa loo diidan yahay, lakin waa mid ka timaaday asaga oo qalad loo fahmay iyo waayo aragnimada aay kala kulmeen markii Soomaaliyaa lagu fuliyay. Sidaa aawgeed, cabashada dadka waxay ku aadantahay erayga “Federaal”. Dhaleecooyinka ugu badan waxay ku hareereysan yihiin fikradda ah; in Federaalku uu yahay nidaam gumeysi oo cusuban oo aay awood shaheeye Soomaalida ku khasbeyso si dalka loo kala qeybiyo; nidaam awood-qeybsi oo u adeegaaya beelaha waaweyn (4.5); mid dhalinaaya khilaaf ku saleysan kheyraadka iyo xuduudaha; iyo mid musuqmaasuqa kor u qaadaaya sida ayaada oo aay jirto ka badbadin hawlaha shaqooyingka xafiisyada iyo miisaaniyadda oo la gordhiyo. Si kastaba ha ahaatee, waxaa kaloo la sheegay in Federaalku uu leeyahay dhinacya kale oo fiican. Waxaa ka mid ah xuriyadda hadalka, dumarka oo leh xuquuq dheeraad ah, dadka dàda yar oo helaaya fursado shaqo iyo kuwo wax barasho. Waxaa la yaab leh in bulshadu aay Federaalku u aragto [oo micnahiisu yahay] mid u taagan dhismaha dowladnimo, horumar iyo siyaasad, halkii loo arki lahaa mabaadìda maamulka ee siyaasada Soomaaliyeed oo aay Khasab tahay in uu lahaada shaambad Soomaaliyeed. Taa badalkeeda, dadku markii aay sharraxayeen nidaamka dowladnimo ee aay rabaan, waxay qoreen mabaadìida asaasiga ah ee Federaalka. Ka qeybgalayaasha waxay sheegeen, markii laga reebo Shirka wajigiisii ahaa khilaafka oo nabad loo baddalo, in waxa ugu badan oo aay ka faaideysteen uu yahay fahanka Federaalka maxaa yeelay waxyaabihii aay halkaas ka barteen waxay ahaayeen kuwo naqdinaaya ama burrinaaya fahankii [qaldanaa] ee aay horay u haysteen.

Talooyinka bulshada ee ku saabsan Federaalka

Iyadoo lagu saleynaayo wadahadalladii iyo dalabaadkii aay ka qeybgalayaasha soo gudbiyeen, waxaa la soo jeedinayaa talooyinkaan hoos ku xusan:

1. In la qabto barnaamijya waci gelineed si dadka loogu sheego mabaadìida asaasiga ah ee Federaalka iyo in la cadeeya fahanka qaldan ee ku aadan Mabaadìida Federaalka.
2. In bulshada laga qeybgeliyo qaabeynta nuqul Federaal Soomaaliyeed ah, ayadoo lagu dari karo qaab dhismeedka dib u eegidda dastuurka Soomaaliyeed.
3. In laga fogaado erayada lagu muransanyahay taas oo looga bixi karo curinta eray Soomaali ah oo u digmo Federaal.

Aragtida Bulshada ee ku aadan Nidaamka qaab dhismeedka Dib u Heshiisiin Qaran

Wasaaradda Arrimaha Gudaha Federaalka iyo Dib u Heshiisiinta ee Soomaaliya waxay ku guda jirtaa qorista qaab dismeedka Dib u Heshiisiin Qaran. Si loo kordhiyo qiimaha qaab dhismeedka Dib u Heshiisiinta Qaran iyo si habkaasi sharciyad loogu helo, Shirka Buulo Burde waxuu fidiyay gogoshii aay bulshadu ku muujin lahayd aragtideeda ku aadan Qaabka Dib u Heshiisiinta Qaran kaas oo aay soo diyaarin doonto Hayàdda Berghof oo kaashaneysa Wasaaradda Arrimaha Gudaha Federaalka iyo Dib u Heshiisiinta ee Soomaaliya si aay u soo qoraan qaabka Dib u Heshiisiinta Qaran. Ka qeybgalayaasha Shirka waxay soo dhaweeyeen guud ahaan fikradda Qaabka Dib u Heshiisiinta Qaran, hadii aay tahay mid ku dhisan cadaalad iyo midnimo oo soo martay waddada wadahadalka iyo wadatashiga. Fikradihii kala duwanaa ee Shirka lagu soo bandhigay waxay waafaqsan yihiin fahamka nidaamka Dib u Heshiisiinta kaas oo diiradda saaraaya dhisidda xirriirada, heerka bulshada iyo heer qaran labaduba. Sidaas ayaa Shirarka waxaa lagu amaanay in aay yihiin kuwa habka Dib u Heshiisiinta qiimo u leh si loo soo celiyo xiriirka bulshada oo noqon kara tusaala dib u heshiisiin hoss ka soo bilaabata oo ka hirgasha Soomaaliyaa. Isla mar ahaantaas, waa in aay jirtaa dib u heshiisiin kor ka soo bilaabta oo heer qaran ah taas oo asaas u noqoneysa qaab siyaasadeed oo cusuban oo lagu baabiìnaaya nidaamka awood qeybsiga ee 4.5, si loo dejiyo dastuur cadaalad ku dhisan oo la jaanqaadaaya dhaqanka Soomaaliyeed iyo diinta Islaamka. Qaabka Dib u Heshiisiinta Qaran waxuu noqon karaa daladda guud ee isu keeneysa labada hab ee kala ah: hoos-kor iyo kor-hoos ayaga oo is kaamilaaya oo is taageeraaya.

Talooyinka Bulshada ee ku aadan Dib u Heshiisiinta Qaran

Ka qeybgalayaasha Shirka waxay soo jeediyeen talooyinkaan soo socda:

1. In la qabto Shirar noqon kara habka ama nooc dib u heshiisiinta bulshada Soomaaliyeed oo hoos laga soo bilaabaaya si loo soo celiyo xiriiradii bulshada.
2. Waa in fikradaha bulshada lagu daraa habka dib u eegidda dastuurka oo bulshada lagala tashtaa natiijada ka soo baxda.

Warbixinta kulankii II: Shirkii Wadahadalka ee Balcad la isugu yimaaday, 29 September - 4 October 2018

“Xoojinta Federaalka ayadoo loo Maraayo badalidda khilaafka, dib u heshiisiin bulsho iyo Dowlad Goboleedka Hirshabelle oo lagu taageero dhexdhexaadinta”

Taariikhd

Laga bilaabo taariikhda markay ehayd 29 September ilaa 4ta October 2018 hayàda Berghof oo kaashaneysa dowlad gobaleedka Hirshabelle ayaa waxay Shir ku qabatay magaalada Balcad. Kulunkaas lixda maalmood socday oo looga wada hadlaayay dhaqanka Soomalida ayaa waxaa kasoo qeybgalay 50 qof oo ka socotay qabaailada iyo beelaha ku nool gobalka ayagoo matalaya qeybaha kala duwan ee bulshada oo aay ka mid yihiin dumarka, dhalanyarta, aqoonyahanka, odayaasha dhaqanka, abwaannada iyo culamada. Dadka isu yimaaday ayaa waxay isla eegeen khilaafadka saameynta uu ku yeeshay umadooda iyo sida khilaafaadka loogu helo isbadal dhanka wanaagsan ah. Dadkii meeshaas ku kulmeen waxaay ka baaraan-dageen khilaafaadka bulshadooda saameeyay iyo habkii khilaafaadkaas wanaag loogu badalilahaa. Waxaa kale oo laweydiiyay inay isla eegaan fikirkooda ku saabsan geedi-socodka ee ka jira heerka dowladda dhexe – geeedi-socdka ku saabsan qoritaanka qaabka dib u heshiisiinta qaran iyo habka federaaleynta. Hadalladoodii soo dhaweynta aha ka dib, ayaa Ahmed shiikh Hussein (gudoomiyaha arrimaha Bulshada ee Hirshabelle), Hassan Mohammed Ibrahim (korneyl boliiska Hirshabelle), Hassan Mohammed Haji (oo ka socda barlamanka Hirshabelle), Ugaas Mohammed Ugas Hassan (Ugaska degmada Balcad), Gadoomiyaha gobalka, Kasim Sheikh Ali Nur ayaa si rasmi ah Shirka u fureen.

Aragtida bulshada ee ku aadan khilaafka wata qalalaasaha

<u>Khilaafyada Balcad ka jira</u>

Degmada Balad waxay soo martay khilaafya is-dabajooga ah oo wato qalalaaso taas oo ku yelatay saameyn dhanka hormarka bulshada iyo wanaaga dadka degaanka. Ka qaybgalayaasha shirka aya si cad u soo bandhigay khilaafyada wato qalalaasaha in aay yihiin sababaha keeno dhibka horyaala bulshada taas oo keento barakac, dagaal, wax soo saar la’aan ku saabsan dhaqaalaha, burbur hanti, ciriiri ku yimaado fursooyinka caafimadka iyo wax barashada. Khilaafka ugu badan Balcad, kaas oo ku saabsan wax soo saarka beeraha, wuxuu ku qotomaa qeybsiga qeyraadka dabiiciga ah gaar ahaan dhulka iyo biyaha. Khilaafka wuxuu ka dhax abuurmaa xoola raacatada sababtuna waa biyaha iyo daaqa; beeraleyda dhankooda oo isku qabsada xaduudaha beeraha iyo biyo waraabka; sidoo kale xoola jirta iyo beeraleyda ayaa isku daca markii aay xoolaha beeraha galaan oo aay dalaga burburiyaan. Khilaafka ka dhex dhaca dad shakhsiyaad ah ayaa isla markiiba isu badala qoys iyo beela oo dhibaata ka ooga bulshada dhexdeeda. Guud ahaan Ka qaybgalayaasha waxaay wadaageen fikradda ah in khilaafyadaan aay horaan u xallin jireen nabadoonada dhaqanka iyo maamulka degmada, [waqxaa kale oo aay wadaageen] in dhicitankooda uu sii yaraaday sanadahaan dambeyey. Taas waxay tusaale u tahay inay mira-dhal keentay maareynta khilaafka oo isbadal wanaagsan laga gaaray Balcad. Si kastaba ha ahaatee, si loo abbaaro sababaha asaasiga ah ee keena khilaafka iyo habka xal waara

looga heli karo, waxaa lagama maarmaan ah in la xoojiyo oo il gaar ah lagu eego maareenta dhinacyadeeda mira-dhalka leh iyo kuwa aan faaidada lahayn.

Hababka xalinta khilaafka

Tobanaanki sana ee la soo dhaafay, waxa la isticmaali jiray habka dhexdhexaadinta iyo waan-waanta si loo xaliyo khilaafka Balcad ka jira, waxana hormuud ka ahaa nabaddoonnada dhaqanka iyo culamada. Guud ahaan Ka qaybgalayaasha waxay isku raaceen in marar badan habka xallinta khilaafka mira-dhal laga gaara haddii jidka cadaaladda loo maro. Si kastaba ha ahaatee, dad badan waxay qabaan fikradda ah in habka loo maro xallinta khilaafka aay ku jirto cadaalad darro kusaleysan qabil oo mar badan xaqooda la lunsado aayna ugu hadli Karin si cad sababta oo ah amaan la'an darteed. Ka qaybgalayaasha waxay qiimeeyeen in fikradaha sida qottoda dheer shirka la isugu dhaafsaday aay faaido badan ku soo kordhisay fahankooda ku saabsan xalinta khilaafka taas o anfacaad ku leh fahankooda iyo hab-dhaqankooda ku aadan arintaan. Ka qeybgalayaasha qaarkood aya sheegay in aaysan horaan si firfircoon ugu qaybqaadan jirin xallinta khilaafka sababtoo ah waxaa loo arki jiray in taas aay tahay mid gaar u ah madax dhaqameedka bulshada. Si kastaba ha ahaatee, shirkan intuu socday waxaa kasoo baxay in uu ahaa mid ku sifoobay ruux wax wada qabsi, masuuliyad, lahaansho iyo in loo dhanyahay. Ka qeybgalayaasha matala beelaha waxay isla garteen fikarka ah inay mudan tahay in laga hortaga khilaafka: "hadda waxaa masuùliyadda naga saaran in aan xallino khilaaf kasta oo ka dhex dhaca bulshada ku nool Balcad". Waxay carrabka ku adkeeyeen in markii aay ku hawlan yihiin xallinta khilaafka aay mabaadiìda cadaaladda iyo sinaanta ku dhaqan doonaan oo aay ku shaqeynayaan wax wada qabsi, siiba markay la macaamilayaan kuwa badan oo aay arinta khuseyso sida dumarka iyo dhalinyarta taas oo loogu daneynaaya danta guud ee bulshada.

Badalidda khilaafka oo loo maraaya jidka dib u heshiinta bulshada

Ka qaybgalayaasha shirka waxay aqoonsadeen habka xalinta khilaafka ee ka jira Balcad, ayagoo arkay meelaha qaab dhismeedkiisa uu daciifka ka yahay oo isla markaana keenay fikrida hababkaas lagu hormarin karo. Sidoo kale, wadahadalka shirka ayaa si wanaagsan waxay uga gudbeen fikradda kooban ee xallinta khilaafka ayagoo diiradda saaray baahida bulsho ee dib u heshiisiineed si loo xaqiijiyo ka hortagga khilaafka iyo ayadoo khilaafkaas dib loo qaabeeyo. Fikradaha la soo bandhigay inta lagu guda jiray Shirkii waxay cabbiraayeen dhanka habsami u socodka dib-u-heshiisiinta, taas oo diiradda saareysa dhisidda xiriirrada (calaaqaadka). Sidaa darteed ayaa dhacdooyinkaan wadahadalada bulshada sida Shirarka loogu amaanay in aay yihiin qaab aay ka muuqato rajo taageera u noqon karta hab dib u heshiisiineed oo abuuri karo jawwi lagu dhiso xiriir, is-aaminaad iyo kalsooni bulshada dhexdeeda ah. Habkaas waa in lagu dhisaa si waafaqsan Shariicada islaamka iyo dhaqanka Soomaaliyeed iyo mabaadiìda guud ee cadaaladda iyo sinaanta.

Ka qaybgalayaasha waxay keeneen waxyaabo kale oo ku haboon in laga munaaqashoodo oo laga baaraandago, gaar ahaan tan ku saabsan cadaaladda wax wada qeybsiga, dhexdhexaadinta iyo ciqaabta. Tusaale ahaan, dadku waxay codsadeen in la ogolaado qeybsashada xaajaadka asaasiga ah sida biyaha, bixinta magdhawga oo la nidaamiya, dhaqanka cafiska iyo raali gelinta. Si aay u dhacda fal celin sax ah marka caadooyinka iyo mabaadi`ida bulshada lagu xadgudbo, ka qaybgalayaasha waxay soo jeediyeen in la sameeyo

nidaam sharci-fulineed oo uu u horreeyo booliiska bulshada iyo Dowlad Goboleedka oo matalaaya darbigii gadaal ka difaacaayay. Guud ahaan doodu waxay muujisay baahida iyo sida aay dadku ugu diyaarsanyihiin dib u heshiisiin loo dhanyahay, hab wadahadal taas oo ujeedadeedu tahay hurumarinta heshiis bulshadeed oo ijtimaaci ah si looga hortago loona baddalo khilaafka oo waliba loo xoojiyo adkeysiga bulshada ee lagala hortagaaya khilaafaadka kala duwan.

Talooyin ka yimaaday bulshada oo keenayo nabad waarto

Si loo taageero ulajeedada bulshada ee ku aadan in aay si wax ku ool ah uga hortagto, u xalliso oo ugu dambeyntiina aay iskood khilaafka u baddalaan, waxaa lasoo bandhigay talooyinkaan hoos ku xusan sida ay soo jeediyeen Ka qaybgalayaasha:

1. Wa in la sameeyo guddi loo dhan yahay si ay usoo ururiyaan warbixinta iyo xaqiiqada ku saabsan khilaafka. Dadka ka tirsan guddigaan wa inay helaan tababar ku saabsan kahortagga iyo xallinta khilaafka.
2. Wa in la sameeyo wadahadal bulsho taas oo xoojineysa dib u heshisiinta oo horumarineysa heshiis bulshadeed oo ijtimaaci ah.
3. Wa in la abuuraa meelo aay bulshada ku wadahadasho taas oo xoojineysa dib u heshisiinta oo horumarineysa heshiis bulshadeed oo ijtimaaci ah. Qaabka shirarka ayaa waxuu ahaa mid si gaar ahaaneed loo soo dhaweeyey markii loo eego mawdhuucaan.
4. Baraamijo wacyigelineed waa in laga sameyaa meelaha sida masaajidada iyo iskoolada si bulshada loo dareensiiyo arimaha aay ka midka yihiin cawaaqibta qalalaasaha, baahida dib u heshiisiineed, arimaha qaranka khuseeya sida geedisocodka federaaleynta iwm.

Aragtida Bulshada ee Ku aadan habka qaabeynta Dib u Heshiisiin Qaran

Wasaaradda Arimaha Gudaha Federaalenta iyo Dib u Heshiisiinta ee Soomaaliyaa (WAGFDH) ayaa hadda waxay ku guda jirtaa qoritaanka qaabka Dib u Heshiisiinta Qaran (DHQ). Si loo tayyeeyo nuxurka DHQ oo loo kobciyo sharciyadda geedi-socodka, shirkii Balcad waxuu soo bandhigay meeshi aay bulshadu DHQ aragtideeda ugu muujin lahayd ayada oo aay soo jaheysay Hayàdda Berghof oo kaashaneysa WAGFDH. Ayada oo la texraacaya diiradda aay sarayaan dib u heshiisiinta bulshada, ka qaybgalayaasha shirka waxay soo dhaweyeen fikradda guud ee Dib u Heshiisiinta Qaran (DHQ) ayaga oo dib u heshiisiin u arkeen in aay tahay arin muhiim u ah Soomali oo idil. Si kastaba ha ahaatee, waxaa xoogga la saaray habka hoos laga soo bilaabaya ee dib u heshiisiinta (hoos kor) ayada oo aay shiraarku yihiin kuwo aan sugeynin sinaata calaaqaad bulshadeed oo kali ah laakin aay u dheertahay mid kor u taagayn sida ayadoo aragtida bulshada laga qeybgeliyo habka maamulka ilaa heerarka u sarreeya. Si arintaan loo xaqiijiyo, waxay ka qaybgalayaasha codsadeen in geedisocodka laga qeybgeliyo dad badan oo aay arintaan khuseyso sida dumarka iyo dhalinyarta. Intaa waxaa sii dheer, dareenka ka qaybgalayaasha ee ku aadan in gobol waliba laga sameeya guddi dib u heshiisiineed iyo heshiis siyaasadeed oo dhab ah oo dhex mara heerarka hogaanka Dowladda Dhexe iyo Dowlad Goboleedyada. Si kastaba ha ahaatee, fikradda jirta ayaa ah in qabiilku uu yahay caqabadda ugu weyn ee hortaagan dib u heshiisiinta gaar ahaan markii lagu sharciyeeyay nidaamka awood qeybsiga ee 4.5. Sidaa darteed, dib u heshiisiin kasta oo dhab ah waa lagama maarmaan in

arintaan lagaga hadla ayada oo ku jireysa heshiis siyaasadeed oo kaas oo ugu dambeyntee lagu muujin doono Dastuurka.

Talo soo jeedin ka timid bulshada oo ku aadan Dib u Heshisiin Qaran

Talooyinkan hoos ku qoran waxaa soo bandhigay ka qeybgalasha shirka:

1. Waa in la sameeya meel aay bulshada fikradeeda uga muujin karto habka Dib u Heshiisiinta Qaran.
2. Habka dib u eegidda dhastuurka wa in loo fahmo inuu xubin muhiim ah u yahay dib u heshisiinta qaran, taas oo u baahan is-dhaxgalka bulshada, aragtidooda iyo wada tashiga oo mira-dhal keeni kara.

Aragtida Bulshada ee ku saabsan federalka

Federaalka waxuu keenay arinta ugu murunka badneyd ee Balcad ka dhacday ayada oo aay ka qaybgalayaashu si aad ah u kala haysteen fikrada kala duwan oo ku aadan faaìdooyinka nidaamkaan uu u leeyahay Soomaaliya. Dadka qaar waxay muujiyeen wadaagidda awoodaha iyo kheyraadka, masuùliyadda shakhsiga iyo tan heerka hoosa, waa fikradda sheegeysha in Dowladda dhexe aay ku ekaato hirgelinta waajibaatka aanan lagu fulin karin heer hoose (oo degmo ama gobol), taasna waa denacyada wanaagsan ee uu Federaalku leeyahay. Kuwo kale (oo ka mid ah ka qaybgalayaasha) waxaa Federaalku u arkeen in uu yahay nidaam lagu khasbay oo aay mudantahay in la baabiìyo maxaa yeelay hadii taas aan la sameynin dadka ayuu qaybinayaa waxuuna xoojinayaa qabiileysiga. Diididda Federaalka laba si ayaa lagu micneyn karaa. Kow, ayada oo micnaha uu erayga xambaarsanyahay aanan si fiican loo fahmin. Tan labaad, waa waayo araganimo gaar ah oo aay dadku kala kulmeen sidii Federaalka Soomaaliyaa looga fuliyay. Gaar ahaan waxaa cabasha laga muujiyay nidaamka awood qaybsiga ee 4.5 kaas oo dad badan aay u nisbeeyeen in uu keenay Federaalka. Si kastaba ha ahaatee, doodaan waxay cadeysay in inkasta oo aay dadku doorbidayaan (oo aay rabaan) mabaadiìda asaasiga ah ee Federaalka, sida awood qeybsiga iyo qeybsashada kheyraadka, hadana inta badan mabaadiìdaan lama xiriirinayaan (uma nisbeynayaan) Federaalka. Sidaa markii loo eego, dood wadaagii iyo fikradihii aay khuburada keeneen waxay ahaayeen kuwo ka qeybgalayaasha aad faaiido ugu lahaa, isla markaana, cabashadii laga muujiyay sidii Federaalka waddanka looga fuliyay waxay ahayd mid meesha taagan.

Talooyinka Bulshada ee ku aadan habka federalka

Ayadoo lagu saleynaaya wadahadaladii iyo codsigii aay soojeediyeen ka qaybgalayaasha, talooyinka hoos ku qoran ayaa lasoo bandhigay:

1. Waa in la sameyo wadahadallo u dhaxeeya bulshooyinka ku nool agagaarka Balcad iyo maamulka degaanka si loo xoojiyo is-aaminaada iyo xiriirrada iyo in la kordhiyo sharciyeynta dowlada degaanka.
2. Waa in la sameeyaa baraamija wacyigelineed si dadka loo wargeliya oo loogu sheego mabaadiìda Federaalka loona tirtiro khuraafaadka laga aaminsanyahay. In la isticmaalo TVga Radiyowga iyo Baraha Internerka ee aay bulshada ku xiriirto ayaagoo ah waddo hawsha lagu fulinaaya.

Warbixintii Shirkii IV: Shirkii wadahadalka ee Beledweyne 3- 8 November 2018

"Xoojinta Faderaalka iyada oo loo maraayo qalalaasaha oo [nabad] lagu badalo: Dib u heshiisiin iyo, Dowlad Goboleedka Hirshabelle oo lagu taageero dhexdhexaadinta bulshada"

Tixraac

Warbixintaan waxay sharaxaad ka bixineysaa wadahadaladii 6da maalmood socday ee Shirkii kulan dhaqameedka, kaas oo lagu qabtay magaalada Baladweyne laga bilaabo 3dii ilaa 8dii November 2018. Shirkaas wadahadalka ah, waa kii sadexaad oo ka mid ah Shirar soo texnaa oo lagu qabtay meelo kala duwan oo ka tirsan Dowlad Gobolleedka Hirshabelle lixdii bilood ee ugu dambeysay sanadka 2018. Shirarka noocaas ah waxay gudiyada u suurta gelinayaan in aay ka wadahadlaan khilaafaadka maxalliga ah ee bulshadooda saameynta ku leh, iyo in aay ku cabbiraan fikradahooda si khilaafaadka xal waara loogu helo.

Ayadoo aay taageero ka heleysa maamulka Dowlad Goboleedka Hirshabelle, ayaa waxay Hayàdda Berghof Shir u qabatay 50 qof oo laga soo xulay mujtamaca qeybahiisa kala duwan ee ku nool Degmada Beledweyne si aay u wada xaajoodaan. Ka qeybgalayaasha waxaa ka mid ahaa: madax dhaqameed, culumo, xirfadlayaal, dumar, fanaaniin, gabyaa, dhalinyaro iyo dadka naafada ah. Ayada oo la raacaya nidaamka xulashada, Hayàdda Berghof iyo Maamulka Dowlad Goboleedka Hirshabelle waxay damaanad qaadeen in shirku uu noqdo mid loo dhanyahay oo aay ka muuqdaan dhamaan beelaha deegaanka. Waxaa si gaar ah xooga loo saaray in laga qeybgeliyo beelaha iyo kooxaha aanan inta badan laga qeybgelinin shirarka noocaan ah sida dumarka, dhalinyarta iyo dadka naafada ah.

Waxaa xafladii furitaanka ka soo qeybgalay Mudane Wali Mohamud Hussein – wasiir ku xigeenka wasaaradda amniga gudaha ee Dowlad Goboleedka Hirshabelle, Mudane Mohamed Ahmed Ibrahim – gudoomiyaha Degmada Beledweyne, Mudane Maslah Mohamed Osman – gudoomiye ku xigeenka Gobolka Hiiraan, Mudane Hassan Mohamed Ibrahim – Korneyl ka tirsan Booliska Hirshabelle, Mudane Sharif Abukar Ahmed – la taliye sare ee madaxweyne ku xegeenka Dowlad Goboleedka Hirshabelle.

Aragtida Mujtamaca ee ku aadan Khilaafaadka Maxalliga ah

Asbaabta iyo waxyaaba dhaliya Khilaafaadka Maxalliga ah

Khilaafaadka maxalliga ah ee degmeda Belledweyne, waxay noqon karaan kuwo u dhaxeeyo afraad ama kooxo, kuwaas oo aay sababaan muran ka dhashay lahaansha dhulka ama soohdin, aar-goosi la xiriirta khilaaf horay u dhacay ama cabashooyin, loolan kursi Barlamaan ama xilal Dowladeed oo sar sare iyo qeybsashada mucaawanada iyo gargaarka baniaadannimo. In kaste oo aay khilaafyadaan had iyo jeer dhacaan, kan ugu badan oo sida joogtada ah u dhaca waxuu ka dhashaa muranka xuduudaha iyo soohdimaha dhul beereedka. Maadaamo aaysan jirin soohdima sugan iyo warqadaha lahaanshaha dhulka, iyo ayada oo uu jiro damac dhul-balaarsi, ayaa waxaa sida badan dhacda in lahaanshah hal

dhul aay dad kala duwan isla wadasheegtaan ayada oo aaysan jirin wax cadeyn ah oo muujinaaya qofka dhab u leh. Markaa qaarkoodna hun ayaaba loo adeegsadaa xallinta khilaafka noocaas ah.

Intaa waxaa dheer tartan xoogan oo ka jira kheyraadka yar sida biyaha gaar ahaan wakhtiyada abaaraha iyo marka aay roob yaraan jirto oo xoola dhaqatada u soo guuraan goobaha biyo galeenka ah taas oo mararka qaar isku dhac ka dhasho.

Maamul wanaagii, kala dambeyntii sharciga iyo qaabkii dowliga oo saxda ahaa oo aan meesha oolin ayaa waxay sababaan khilaafka iyo qalalaasaha ka dhaca degmada. Maqnaanshaha maamul dowli ah iyo hayàda xoogan oo amni ayaa waxay dhalaan fawdha (sharci laàan) maadaama dadka aaysan ka baqeynin awooda dowladda. Intaa waxaa dheer, natiijooyinka xallinta khilaafaadka iyo ama hanaanka dhexdhexaadinta oo loo arko in aay yihiin kuwo aan cadaalad ku dhisnayn ayaa waxay horseedaan khilaafaadka maxalliga ah. Xaaladda marka aay sidaa atahay, Kooxda tabaneysa in laga eexday ayaa sida badan waxay goànsataa in aay aar goosata. Ugu dambeyntii, qeybsiga mucaawanada aay keenaan haàdaha caalamiga ah ayaa waxay dhaliyaan isku dhac bulsho maxaa yeelay bulshada qeybaheeda saameynta leh ayaa waxaa loo qoondeeyaa qeyb libaax halka qeybaha kale ee laga tirada badanyahay aay wax yar ka helaan.

Khilaafaatkaan waxaa asal u ah tartan awoodeed iyo qeybsiga kheyraadka. Dad badan oo shirka joogay ayaa waxay dareensanaayeen in qaybinta iyo wadaagidda kheyraadka aaysan ahayn mid cadaalad ku saleysan. Awood qeybsiga aanan isu dheelitirnayn ee ku saleysan nidaamka 4.5 ayaa ka mid ah waxyaabaha dhaliya khilaafaadka maxalliga ah ee ka dhaca degmeda maa daama uu nidaamkaas yahay midka sharciyeeyay qabiileysiga iyo cadaalad darrida ee ku aadan dhanka siyaasadda. Wadahadallada waxay muujiyeen, in siyaasiyiinta intooda badan aay ku tartamaan xilalka sare ee dowladda si aay u xakameeyaan oo aay u maamulaan awoodda iyo kheyraadka. Taas waxay gees u riixaysaa qeybo ka mid ah bulshada gaar ahaan kuwa laga tirada badanyahay waana midda dhalisa khilaafaadka.

Ka qeybgalayaasha shirka waxay muujiyeen in inkasta oo aay khilaafyada markooda hore aay ka bilowdaan afraad, waxay u gudbaan heer beeleed, gaar ahaan marka aay soo dhexgalaan rag hubeysan oo doonaaya in aay u soo hiiliyaan qabiilkooda. Khilaafaadka maxalliga ah ee ka dhaca Beledweyne wuxuu saameyn weyn ku yeeshaa nolosha bulshada: "...Waxaa mustaxiil ah in ... khilaafka uu saameyn ku yeelanweya nolosha dadka". Sida aay u arkaan ka qeybgalayaasha, khilaafaadka maxalliga ah waxay caadi ahaan sababaan dhimasho, burbur hantiyeed, bililiqo, barakac, dhaqaalaha oo xumaada, fursada wax-barasho oo la waayo amaan-darro aawgeed (gaar ahaan meelaha uu khillafka ka jiro), iyo cadaawad ka dhexdhacda bulshada uu khilaafka u dhaxeeyo. Markii ka qeybgalayaasha la weydiiyay bal in aay ka fikiraan noloshooda oo aanan ka jirin wax khilaaf ah, waxay kulligood sawirteen nolol leh rajo, amaan iyo horumarin oo uu qof kasta haysto fursad uu riyadiisa (hamigiisa) ku gaaro.

Jilayaasha khilaafaadka maxalliga ah

Sida laga soo xigtay ka qeybgalayaasha shirka, khilaafaadka maxalliga ah ee ka dhaca degmadas Beledweyne waxaa si xun u saameeyay tiro dad ah oo aay ula jeedadoodu tahay danohooda gaar ahaaneed ama danaha beeshooda. Shakhsiyaadkaas ama kooxahaas waxay isticmaalaan habab kala duwan oo si toos ah ama si dadban u saameynaaya khilaafaadka maxalliga ah. Tusaale ahaan, siyaasiyiinta ayaa loo arkaa in aay yihiin jilayaasha asaasiga ah oo sida xun saameynta ugu leh

khilaafaadka maxalliga ah ee ka dhaca degmada ayaga oo eeganaaya danahooda khaaska ah iyo danaha bulshadooda. Waxay isticmaalaan maqaamkooda iyo awoodooda dhiirogelinta ragga ka tirsan beeshooda si aay dagaal u huriyaan ayaga oo ilaashanaaya danahooda, danaha deegaankooda iyo kuraastooda siyaasadeed

Ganacsatada qaarkood, gaar ahaan kuwa kooxaha dagaalamaya ka iibiya hubka, cunnada iyo shidaalka, ayaa waxay saameyn xun ku leeyihiin khilaafaadka. Danta ugu weyn ee aay leeyihiin ayaa ah in uu khilaafka sii daba dheeraada si aay u xajistaan suuqa badeecadahooda.

Qolada sadexaad ee khilaafaadka dhaliya, ama khilaaf horay u jiray sii huriya waa qurba-joogata ayaga oo adeegsanaaya xiriirada caalamiga ah ee aay la leeyihiin beelaha aay ka soo jeedaan ayaga oo siiya taageera maaliyadeed oo aay dagaalka ku sii wadaan. Madaxda beelaha ayaa ayaguna waxay ciyaaraan door kaas la mid ah. Ayaga oo ka faaìdeysanaaya kalsoonida aay dadka ku qabaan ayaa waxay si xun saameyn ugu yeeshaan khilaafaadka oo waxay abaabulaan taageera dhaqaale si uu khilaafka u sii socdo.

Dad kala duwan ayaa loo aqoonsaday in aay yihiin kuwo si sahlan u kicin kara khilaafka ayaga oo adeegsanaaya masraxa ama shabakadahooda. Tusaale ahaan, saxaafada waxaay sii hurin kartaa khilaafyada ayada oo sii buun buunineysa wararkas iyo macluumaadka lala wadaaga afraada mujtamaca. Gabyaaga iyo muàlifiinta ayaa ka mid ah kuwa sii huriya khilaafaadka ayaga oo alifa gabay ama heeso amaanaaya oo dhiiri gelinaaya kooxda aay taageerayaan oo isla mar ahaantaasna kooxda kale magaca ka haleynaaya. Dumarka iyo dhalinyarta ayaa ayaguna waxay ciyaari karaan door xun oo ku aadan oogidda dagaal cusub ama hurinta mid horay u jiray, taas oo lid ku ah fikradda sida weyn looga aaminsanyahay dumarka in aay yihiin kuwa u dooda nabadda bulshada.

Hanaanka Xallinta Khilaafka iyo doorka la kala leyahay

Khilaafaadka kajira degmada Beledweyne waxaa lagu xalliyaa nidaamka Xeer dhaqameedka Soomaaliyeed ee sida weyn loo ogolyahay. Sida laga soo xigtay ka qeybgalayaasha Shirka, 30kii sane ee lasoo dhaafay nidaamkaas isma uusan badalin waana mid illaa iyo wakhtigaan lagu guuleystay. Nidaamka waxaa maamula odayaal dhaqameed kuwaas oo soo kala dhex gala khilaafka maxalliga ah iyo kooxaha uu dagaalka dhex yaala. Inta badan, soo faragelintooda waa mid aay soo dhaweeyaan oo aay ixtiraamaan kooxaha uu khilaafka dhex yeela iyo guud ahaan bulshada.

Madaxda diinta ayaa loo aqoonsaday in aay soo galayaan qeybta labaad ee jilayaasha xallinta khilaafaadka. Marka aay dhex dhexaadinayaan kooxaha is khilaafsan oo aay dhiirigelinayaan nabad ku wada noolaanshaha xubnaha bulshada, madaxda diinta waxay xooga saaraan tacaaliimta Islaamka (sida is-cafiska, dulqaadka, naxariis iyo beerjileec). Sida nidaamka xeer dhaqameedka, doorka madax diimeedka ee ku aada nabadda, waa mid sanada badan lagu guuleystay. In kasta oo aay kooxdaan tahay mid hawsheeda kaligeed wadata, waxaa dhacda in mararka qaar loo yeero si aay u taageeraan shaqada madax dhaqameedka.

Doorka dhalinyarta iyo dumarka aay ku leeyihiin xallinta khilaafka iyo u ololeynta nabadda waa mid aay ka qeybgalayaasha dhamaantood amaaneen. Waxay xuseen in dumarka iyo dhalinyarta aay awood u leeyihiin qancinta eheladooda, saaxiibadooda iyo kuwa aay isku dànta yihiin si aay u joojiyaan rabshadaha wakhtiyada khilaafka. Si aay nabadda u hormariyaan, dumarka iyo dhalinyarta waxaa lagu

yaqaanaa in aay u doodaan dulqaad iyo nabad ku wada noolaanshaha bulshada ku nool Beledweyne. Waxay kor u qaadaan wacyi gelinta ku saabsan saameynta iyo cawaaqibta uu khilaafka leeyahay. Ayagoo ah masùuliyiin ka tirsan bulshada, ayaa ganacsatada Beledweyne waxay xallinta khilaafka ka ciyaaraan door muhiim ah. Waxay maalgeliyaan oo aay ka qeybgalaan Shirarka dib u Heshiisiinta bulshada ayaga oo ka shaqeya danaha mujtamaca. Saxafiyiinta sida wariyayaasha ayaa ayaguna u ololeeya nabadda, ayaga oo adeegsanaaya barnaamijadooda TVga iyo Radiyaha. Sida laga soo xigtay ka qeybgalayaasha, farsamooyinka wakhtigaan jira ee xallinta khilaafka waxaa lagu horumarin karaa:

- In la kordhiyo doorka aay madaxda diinta (culumada) ku leeyihiin hanaanka.
- In xag dhaqaale lagu taageera hindisaha xallinta khilaafka, maxaa yeelay waxaa loo baahanyahay safarro iyo in la qabto Shirar iyo fadhiya wadahadal.
- In la maal-geliyo qoridda dastuurka, kaas oo cadeyn lahaa doorka aay hayàdaha Dowladda leeyihiin.
- In la xoojiyo ciidanka Booliska iyo nidaamka garsoorka, ayada oo la wanaajinaaya amniga guudahaaneed ee Gobolka Hirshabelle.
- In la sameya wacigelin ku saabsan hanaanka madaniga ah si mujtamaca looga ciribtiro dhaqanka qolo qoleysiga.
- In la kordhiyo xirfadda iyo awooda dhex dhexaadiyayaasha maxalliga ah ayada oo loo sameynaaya tababarro iyo aqoon is-weydaarsi.

Aragtida Bulshada ee ku saabsan Federaalka

Ka qeybgalayaasha shirkii Beledweyne waxay ahaayeen kuwo ku kala duwan fikradaha aay ka qabaan Federaalka iyo habka Federaaleynta. Hal koox waxay aaminsanayd in uu Federaalka yahay nidaamka ugu fiican oo ku haboon in wadanka lagu maamulo, halka aay kooxda kale aay Federaalka mucaarad ku ah ayada oo sheegtay in uu sabab u yahay kala qeybsanaanta mujtamaca Soomaaliyeed. Kooxdaan dambe waxay ku doodeysaa in Soomaalidu aay yihiin dad isku mid ah oo isku diin ah, sidaa darteed Federaalka ma noqon karo mid ku haboon in dal noocaas ah lagu maamulo, maxaa yeelay Federaalka waxaa loo sameyay umad kala jinsi ah. Abuuritaanka Dowlad Goboleedyada (mid kasta madaxweynaheeda leh), oo ah awood la tartamaaya dowladda dhexe, iyo doorka aay mid kasta leedahay oo meesha ka maqan ayaa u sabab ah fikradahaas kala duwan.

Sida aay la tahay ka qeybgalayaasha Shirka, fulinta Federaalka waxaa hortaagan caqabada. Waxaa jirta fahan laàan ku aadan Federaalka iyo mabaadi`diisa. Tani waxay dhashay fahan qaldan iyo mucaarad Federaalka la mucaaradsanyahay. Ka qeybgalayaasha waxay dareemeen in uu Federaalka sharciyeeyay nidaamka awood qaybsiga 4.5 ee aad u faafsan. Maadaama nidaamka 4.5 aay ka hor imaadsanyihiin in badan oo mujtamaca ka mid ah sababtana aay tahay asaga oo u eexanaaya beelaha waaweyn, Federaalkana asaga ayaa lala xiriiriyay oo sidaas ayaa loo diiday. Intaa waxaa dheer, dastuurka qabyada ah waxuu wiiqayaa hanaanka Federaaleynta. Ka qeybgalayaasha waxay ku doodeen in damaashi tirka dastuurka uu shardi u yahay helitaanka iyo meel marinta Federaal lagu guuleysto maxaa yeelay waa asaaaskii fulinta. Intaa waxaa sii dheer, faragelinta wadamada jiiraanka ah sida Itoobiya iyo Kenya iyo dowlada kale oo aay ka mid yihiin Qatar, Imaaraadka, iyo Saudi Arabia ayaa

habkii Federalka khadka ka bixiyay. Wadamadaan waxay leeyihiin dana kala duwan oo iska hor imaadsan. Ugu dambeystii, waxaa jira dhaqaala la'aan baahsan oo soo wajahday Dowladda Dhexe taas oo ka hor istaagtay in aay habka feraaleynta ka fuliso dhamaan waddanka oo idil.

Aragtida Bulshada ee ku aadan Qorshaha Dib u Heshiisiinta Qaran

Ka qeybgalayaasha shirka waxay soo dhaweeyeen geedi-socodka qorshaha Dib u Heshiisiinta Qaran oo aay hogaamineysa Wasaaradda Arimaha Gudaha iyo Federaaleynta. Waxay ogaadeen in qaabkaasi uu yahay mid muhiim u ah in xal loo helo dhibaatooyinka 30kii sane ee la soo dhaafay waddanka ku habsaday. Hase yeeshee, fikirka ka qeybgalayaasha waxuu ahaa in dowladda aay daacad ka ahaata qaab dib u heshiisiineed oo shaamil ah, waana in uu noqdaa mid ah hoos-kor oo aay micnaheedu tahay Dib u Heshiisiin hoos laga soo bilaabay. Ka qeybgalayaasha waxay soo jeediyeen talaabooyin dhowr ah oo u baahan in la tixgeliyo marka la sameynaaya Qaabka Dib u Heshiisiinta Qaran:

- Fikradda Dib u Heshiisiinta waa in aay hogaamiyaan dad xirfad iyo waayo aragnimo u leh, waana in la dhiso tayyada kuwa aanan lahayn xirfad ku filan.
- Waa in la kordhiyaa oo la sugaa amaanka goobaha dib u heshiisiinta aay ka socoto.
- Dowladda waa in aay hindisaha dib u heshiisiinta dhaqaale ku filan u qoondeysaa.
- Dowladda waa in aay hor istaagtaa ashkhaasta sida xun saameynta ugu leh khilaafaadka maxalliga ah.

Warbixinta kulankii 4raad: Shirkii Wadahadalka ee Jowhar la isugu yimaaday, 28 November - 4 December 2018

“Xoojinta Federaalka Ayadoo loo Maraayo Badalidda Khilaafka, Dib u Heshiisiin Laga Taageero Dhexdhexaadinta”

Taariikh

Warbixintaan waxay soo bandhigeysaa wadahadaladii 6da casha oo ku saleysnay shirkii dood dhaqameedka ee lagu qabtay magaalada Jowhar laga bilaabo taariikhdu markay ahayd 28 November ilaa 4 December 2018. Shirkaas wadahadalka waxuu u dambeyay kulamo is xigxigay oo lagu qabtay meelo kala duwan oo ka tirsan Gobolka Hirshabelle lixdii bilood ee ugu dambeeyay sanadkii 2018ka kaas oo bulshada u fidiyay gogol aay kaga wada hadlaan khilafaadka dhex yaala ee saameeyay mujtamacooda iyo in aay ku cabbiraan aragtidooda habkii aay khilaafka xal waara ugu helilahaayeen. Ayadoo uu maamulka Hirshabelle caawinaaya ayay Hayàdda Berghof waxay kulmisay 50 ruux oo laga soo xushay kooxo kala duwan oo ka kala yimid meela badan oo ka tirsan degmada Jowhar si aay uga qeybqaataan shirka wadahadalka. Ka qeybgalayaasha waxaa ka mid ahaa culamaaudiin, xirfadlayaal, dumar, fannaaniin, gabyaa, dhalinyaro iyo dad naafa ah. Ayadoo la tix raacaya tilmaamaha xulashada, ayaa Hayàda Berghof iyo Maamulka Hirshabelle waxay labaduba balanqaadeen in ka qaybgalayaasha shirka aay noqondoonaan mid aay beelaha deegaanka u dhanyihiin. Waxaa dadaal deeraad ah loo galay sidii looga qaybgelin lahaa kooxaha la faquuqo sida dumarka, dhalinyarta iyo dadka naafada ah. Waxaa furitaankii shirka ka soo qaybgalay gudoomiya ku xigeenka Shabeelada Dhexe ee arimaha siyaasadda Mudane Mohamed Abdi Sheikh (Xaadow), Gudoomiyaha Degmada Jowhar Mudane Osman Mohamed Mukhtar (Baarey), Duqa Degmada Jowhar Mudane Salah Muudey Ali, iyo sidoo kale marti-sharaf kale. Hayàdda Berghof Maamulaheeda sare ee Mashruuca Mudane Abass Kassim iyo marti-sharafka ayaa waxay carrabka ku adkeeyeen muhiimadda uu Shirku u leeyahay in khilaafaadka xal waara loo helo iyo in kor loo qaado dada noolaanshaha bulshada dexdeeda.

Aragtida bulshada ee ku Aadan khilaafaafka maxalliga ah

Jiritaanka khilaafaadka maxalliga ah

Waxay ka qaybgalayaasha dhamaan wadaageen khilaafaadka Jowhar ka dhaca iyo cawaaqibta aay reebaan. Ka qabgalayaasha waxay ku doodeen in khilaafaadka Jowhar ka dhaca aay yihiin kuwo u dhexeeya afraad, reera iyo kooxo ayada oo aay sababaan lahaansha dhuleed oo lagu muransanyahay, soohdimaha dhulka oo aanan aad u kala cadayn, dhul la dagganyahay oo aay lahaanshadiisa laba ruux ama ka badan ku muransanyihiin, xoola daaqay beer aay dad kala leeyahiin, kheyraad yar oo lagu tartamo sida biyaha, gaar ahaan wakhtiyada abaaraha iyo qaybsiga kheyraadka sida fursadaha shaqada ee heer Goboleed. Ka qaybgalayaasha qaar ayaa waxay aaminsanaayeen in inkasta oo khilaafaadkaan aay Degmada ka dhacaayeen, bilihii la soo dhaafay waxaa jiray xoogaa xaalad degenaansha ah. Dhamaan ka qabgalayaasha waxay isku raaceen in khilaafaadka cadi ahaan aay ka

bilowdaan heer shakhsiyaad kadibna aay u gudbaan qalalaasa heer reer reer ama beelo, gaar ahaan markii aay ragga beesha dagaalka soo galaan. Tan waa dhaqan ka jira Soomaaliya, maxaa yeelay dhinacyada uu khilaafka ka dhaxeeya waxay inta badan filanayaan in ragga beeshooda ka tirsan aay dagaalka ku taageeraan, arintaas oo khilaafka usii gudbiso heer beleed oo waliba sababta dhimasho, burbur hantiyeed iyo in aay dad ku barakacaan.

Sababaha asaasiga ah ee dagaalka

Sida laga soo xigtay wadahadaladii shirka, khilaafka deegaanka Jowhar waxaa lagu sifeyaa arimo dhowr ah. Ugu horeyntii, tan ugu muhiimsan ee khilaafka asaaska u ah waa ayada oo aysan jirin dowlad awood leh. Ilaa iyo markii aay burburtay dowladii dhexe ee Soomaaliya sanadkii 1991, ma jirin wax maamul ah iyo sharci-fulin heer deegaan ah [oo waddanka oo idil isku hayay]. Tani waxay dhalisay xaalad aaysan dadku ka baqaynin awood dowladeed, taas oo horseedeysa heer fowdo ama nidaam darro. Tan labaad, waxay ka qaybgalayaasha isla qireen in dhaqamada cadaalad-darrada ku saleysan ee aay bellaha waaweyn kula dhaqanayaan beelahay laga badan yahay aay horseeday khilaafaadka qalalaasaha watta ee degmada ka dhaca intooda badan. Tusaale ahaan, waxaa dhacda xaalad in dhul uu leeyahay qof ka soo jeedo beelaha laga tirada badanyahay uu sheegto qof kale oo ka soo jeedo beelaha waaweyn. [Waxay u badantahay] qofkii ka soo jeeday beelahay laga tirada badnaa in uu ka raja beelo helitaanka dhulkiisii taas oo horseedeysa in uu dagaal maciin bido oo uu u arko xalka kama dambeysta ah. Tan sadexaad, jaahli iyo faqri ayaay ka qaybgalayaasha u arkeen in aay ka mid yihiin sababaha asaasiga ah ee khliaafka dhaliyo. Dhaqaalo xumida iyo faqriga waxay dadka ku dhaliyaan rajo xumi iyo niyadjab ayagoo ka dhiga gaar ahaan kuwa shaqo laàanta ah in aay u dhaga raariciyaan hadii loogu yeero ka qeybgalka rabshadaha. Tan afaraad, doodihii shirka waxay cadeeyeen in tacaaliimta Islaamka iyo dhaqankii Soomaaliyeed (kuwaas oo dadka nabad ku booriyo kana hor imaadsan rabshadaha) oo aanan loo dhaga nuglanin aay sabab u yihiin khilaafaadka degmada jowhar, waa sida aay dadka badankoodu aaminsanyihiin.

Jilayaasha khilaafaadka maxalliga ah

Ka qabgalayaasha shirka waxay sheegeen jilayaal dhowr ah kuwaas oo si xun raad ugu leh khilaafaadka maxalliga ah ee ka dhaca degmada Jowhar si aay u gaaraan danahooda gaarka ah iyo danaha beelaha aay ka soo jeedaan. Ayaga oo si toos ah iyo si dadbanba u dhaqmaaya ayaa jilayaashaan waxay adeegsadaan habab dowr ah si aay u sii huriyaan khilaaf jira ama aay u dhaliyaan mid cusuban. Ugu horeynti, siyaasiyiinta deegaanka iyo kuwa qaran labaduba farta ayaa lagu fiiqay in aay ka mid yihiin jilayaasha sida xun khilaafaadka deegaanka u huriya si aay u horumariyaan damacooda siyaasadeed iyo kan deegaankooda. Tan labaad, ganacsatada ayaa ayaguna huriya khilaafaadka jira ama abuuro khilaaf cusuban si aay u xaqiijiyaan faidooyin ganacsi. Dadkii munaaqashoonaayay waxay ku doodeen in kuwa hubka iibiya ee saldhigga ku leh deegaanka iyo magaalada Muqdishu aay hubka ka gadaan dhinacyada is dagaalsan ayada oo helitaanka hubka uu dagaalka sii hurinaaya. Dad badan waxay ku doodeen in danaha ganacsatadaan yihiin dagaaladda oo sii socdo si ganacsigoodu uu u horumaro.

Tan sadexaad, gabyaaga iyo muàlifiinta ayaa farta lagu fiiqay in aay yihii kooxda kale ee sida xun khilaafaadka Jowhar ka dhaca ugu lugta leh. Afraadaan ayaa waxay abuuraan gabay iyo heeso amaanaaya dhinac ka mid ah labada kooxood ee dagaalameysa ayaga oo liidaaya kooxda kale. Erayada gabayga iyo heesaha lagu isticmaalaaya waa kuwo loogu talagalay in koox dagaalka lagu dhiiro geliyo

si aay kooxda kale u jibiso ayaga oo isla mar ahaantiina sheegaaya ceebaha kooxda kale. Caadi ahaan, sababaha dhiiri gelinaaya in gabyaaga iyo fanaaniinta aay ka qeybqaataan waa kow, in aay u arkaan waajib ka saran dhiiri gelinta afraadda beeshooda ee safka hore ka dagaalamaaya. Labo, mid dhaqaale. Tan afaraad, waa odayaal dhaqameedka oo ka mid ah kuwa raadka xun ku leh khilaafaadka maxalliga ah ayaga oo loo maleynaaya in aay nabad u ololeynayaan. Muddadii aay dooda socotay, arintaan dood kulul ayaay dhalisay maxaa yeelay dadka qaar waxay u arkeen in odayaasha dhaqanka aay bulshada ka tirsanyihiin ayagoo isla markaana ka shaqeeya nabad ku wada noolaanshaha bulshada. Si kastaba ha ahaatee, waxaa laisla meel dhigay [xaqiiqada jirta oo ah] in odayasha dhaqanka badankoodu lagu yaqaano nabadeynta bulsha, lakiin isla markaana aay jiraan kuwo dagaalka huriyo ayadoo aay ulajoodadoodu tahay in aay beeshoodu taageeraan ama in aay maal helaan.

Habka xallinta khilaafka

Sida ka qaybgalayaasha shirka laga soo xigtay, khilaafaadka Jowhar badankoodu waxaa lagu xalliyaa wada hadaka dhinacyada is hayya, inkasta oo mararka qaarkoodna maamulka deegaan uu xakameeyo dhinaca soo xadgubay. Nidaam garsoor oo rasmi ah oo aan jirin aawadeed, ayaay dad badan oo Degmada Jowhar degan waxay ku tiirsanyihiin hab dhaqameedka khilaafka lagu xalliya ee loo yaqaano `xeer`, kaas oo aay hawl wadeen ka yihiin madax dhaqameed la aaminsanyahay. Madax dhaqameedka waxaay soo kala dhexgalaan kuwa is-khilaafsan ayaga oo waan waan ka dhex abuuro si nabad loo helo ayaga oo adeegsanaaya qiyyamka dhaqanka Soomaaliyeed. Badankood ka qaybgalayaashii shirka Jowhar waxay aaminsanaayeen in habkaan uu yahay mid guuleysta maxaa yeelay waxaa hormuud ka ah dad bulshada dhexdeeda ixtiraam ku leh, waana hab waxtarkiisa sanada badan la cadeeyay. Culamaùddiinka, dumarka, dhalinyarta iyo aqoonyahannada ayaa ayaguna aay ka qaybgalayaasha shirka sheegeen in aay yihiin jilayaasha muhiimka ah ee geedisocodka xallinta khilaafka. Culamaaùddiinka ayaa soo galaaya qaybta labaad ee ugu muhiimsan markay noqoto nabadeynta dhinacyada uu khilaafka dhaxyeela iyo u ololeynta nabad ku wada noolaanshaha xubnaha bulshada reer Jowhar. Ka qaybglayaasha waxay ku doodeen in culamaaùddiinka – kuwaas oo dhexdhexaadintooda aay bulshadu si aad ah u ixtiraamto – ayaa waxay adeegsadaan tacaaliimta Islaamka si aay rabshadaha u joojiyaan oo hadhowna aay u heshiisiiyaan dhinacyada isku dhacsan.

Doorka muhiimka ah ee dumarka iyo dhalinyarta ayaa ka mid ahaa waxyaabihii kale ee Meesha lagaga hadlay, gaar ahaan awoodda aay u leeyihiin in aay rabshadaha cambaareeyaan oo aay nabadda bulshada u ololeeyaan. Maa daama dumarku Soomaali dhexdeeda looga aqoonsanyahay in aay yihiin laf dhabarkii nabdda, waxay ciyaaraan door muhiim ah oo ku aadan nabadeynta ayagoo koox koox isu abaabula si aay ragooda, wiilashooda iyo xubnaha kale ee bulsha ugu qanciyaan joojinta rabshadaha. Waxay hawshaan ku sameyn karaan ayaga oo adeegsanaaya habab kala duwan oo aay ka mid yihiin ciyaar dhaqameedka, gabayga iyo olola wacyigelineed. Sidoo kale, dhalinyarta koox koox ayaa isu abaabuli karaan ayaga oo nabadda u ololeynaaya oo asaxaabtooda aay isku dàd yihiin oo dagaalada safka hore kaga jira ku qancinaaya in aay rabshadaha joojiyaan. Aqoonyahannada sida mutacalimiinta iyo wariyayaasha ayaa ayaguna loo arkay in aay yihiin jilayaal muhiim u ah xallinta khilaafka maa daama aay minbarka (fursadooda) u adeegsanayaan wax barid iyo war baahin canbaareynta rabshadaha iyo u ololeynta nabadda.

Si loo horumariyo habka xallinta khilaafka ee hadda Jowhar ka jira, waxay ka qaybgalayaasha soo bandhigeen in xoogga la saara adeegsiga tacaaliimta diinta Islaamka markii dadka la dhexdhexaadinaya. Tacaaliinta islaamka ayaa ah mid si weyn aay bulshada u ogoshahay waxayna xal

waara u noqon kartaa khilaafka rabshadaha wata ee Hirshabelle ka jira. Tusaale ahaan, habka dhexdhexaadinta waa in lagu dhabbaqaa mabaai`da Islaamka sida is cafinta, naxariista, isu roonaanta iyo dib u heshiisiinta. Ka qaybgalayaasha waxaa kale oo aay muujiyeen baahida loo qabo in la helo dhexdhexaadiyayaal kala duwan sida odayaal dhaqameedka, culamaaudiinka, dumarka iyo dhalinyarta kuwas oo wada shaqeynaaya oo dadaalkooda isku biirinaaya si aay u xalliyaan khilaafaadka bulshadooda ka dhax jira.

Ka qaybgalayaasha waxaa kale oo aay soo bandhigeen:

- In Hayàdda Berghof aay sii waddo taageeradeeda ku aadan dhexdhexaadinta [ka socota] Jowhar si khilaafka xal waara looga hela.
- Baahida loo qabo baraamijya wacyigelineed oo dheeraad ah si nabad ku wada noolaasha loogu ololeeya oo dadka loogu sheego cawaaqib xumida khilaafaadka uu bulshada Jowhar u leeyahay gaar ahaan dadka tuulooyinka fog fog ku nool.
- In taageera loo muujiya oo la xoojiya guddiga nabadda maxalliga ah ee Jowhar.
- In la abuuro nidaam garsoor hufan ah oo shaqaynaaya.
- Culamaaudiinka iyo dumarka waa in si gaar ah loogu dhiira geliyaa in aay ka qaybqaataan geedi-socodka xallinta khilaafka maadaama aay ayagu leeyihiin karti u gaar ah oo xubnaha bulshada lagu qancin karo si aay rabshadaha u joojiyaan oo aay nabad u keenaan.
- Ciidamada qalabka sida, sida booliiska waa in la siiyaa tababarro sax ah si aay ugu falceliyaan oo aay u joojiyaan rabshadaha wakhtiyada colaada.

Aragtida Bulshada ku aadan Federaalka

Ka qaybgalayaasha waxaay soo bandhigeen fikrada kala duwan oo ku saabsan Federaalka iyo habka Federaaleynta ee Soomaaliyaa. Qaar kaqaybgalayaasha ka mid ah waxay taageereen Federaalka ayagoo u arkay in uu yahay nidaamka maamul kan ugu wanaagsan kuna haboon in Soomaaliyaa aay adeegsato kaas oo xal u noqon karo khilaafaadka waddanka ka jira. Kooxdaan waxay si is-burrineysa (hadal is-burrinaaya) u doodeen oo aay codsadeen dowlad dhexe oo xoog badan ayagoo isla markaana u dooday nidaam dowladeed oo aay awood dhexe u taliso.

Dhinaca kale, kuwa Federaalka ka hor imaadsan waxay la tahay in uu yahay mid ummadda beelo u kala qeybinaaya. Kooxdaan dambe waxay aaminsantahay in Federaalku loogu talagalay dad kala isir, kala diin iyo kala dan ah. Taas oo aaysan Soomaalidu ku sifeysnayn maxaa yeelay Soomaalidu waa dad isku mid ah oo isku diin ah. Si la mid ah kooxdii ka horeysay ayaay kooxdaan waxay u doodayaan in la helo dowlad dhexe oo awood leh, lakin waxay rabaan in la tirtiro dowlad goboleedyadii uu nidaamka Federaalka ah sameeyay. Markii loo kaco dhanka hirgelinta Federaalka, badankood ka qaybgalayaasha waxay ku doodeen in aanan qaadashadiisa lagala tashanin oo aanan la barin muhimmadda uu waddanka u leeyahay. Waxay ku doodeen in dhamaashitirka dasturka uu shardi u yahay hirgelinta nidaam Federaal oo guuleysta, maxaa yeelay dasturku asaga ayaa ah asaaskii geedisocodka. Ka

qaybgalayaasha waxay Dowladda Dhexe ka codsadeen in aay qaado afti dad-weyne si shacabku u helo fursad uu fikraddiisa ku muujiyo.

Arinta ku saabsan calaaqaadka u dhaxeeya Dowladda Dhexe iyo Dowlad Goboleedyada xubnaha ka ah, ka qaybgalayaasha waxay sheegeen dhowr arimood oo sabab u noqday khilaafaadka Dowladda ka dhex ka jira. Arimahaas waxaa ka mid ah awoodo iska soo horjeeda ayadoo aay sababtuna tahay qawaaniintii iyo siyaasadii kala hagi lahayd oo aan jirin, iyo Dowlad Goboleedyada oo aaysan midnimo dhex oolin. Si arrintaan wax looga qabto oo loo wanaajiyo wada shaqeynta Dowladda Dhexe iyo Dowlad Goboleedyada xubnaha ka ah, waxay ka qabgalayaasha muujiyeen baahida loo qabo in la qeexo doorka aay mid kasta leedahay iyo in la asaaso qawaaniin ku aadan qaybsiga kheyraadka heer goboleed iyo heer dastuurka qaran si kor loogu qaado wada shaqeyn caafimaad leh oo dhex marta labada heer dowladeed.

Aragtida Bulshada ee ku aadan Qaabeynta habka Dib u Heshiisiinta Qaran

Ka qaybgalayaasha shirka waxay soo dhaweeyeen fikradda ah Geedisocodka Dib u Heshiisiin Qaran oo dhab ah oo aay gar wadeen ka tahay Wasaaradda Arimaha Gudaha, Fedeaalka iyo Dib u Heshiisiinta (WAGFDH). Waxay aaminsanyihiin in hindisaha Dib u Heshiisiinta Qaran lagu gaari karo xalkii aay Soomaalidu tobonaankii sane ee la soo dhaafay u oomanayd haddii dib u heshiisiintaas aay ku saleysantahay tacaaliimta Islaamka oo la hirgeliya ayada oo lala kaashanaaya Dowlad Goboleedyada. Ka qaybgalayaasha waxay ku doodeen in dib u heshiisiin ku saleysan tacaaliimta Islamka aay tahay mid aay ogolaanayaan Soomaali oo idil meel kasta oo aay ka yimaadaanba. Waxaa xoogga la saaray ruuxda is-cafiska taas oo ka mid ah mabaadìda asaasiga ah ee Islaamka. Ugu dambeyntii, ka qaybkalayaasha waxay muujiyeen in qabiileysiga oo la ciribtiro iyo dastuurka oo la dhamays tiro aay yihiin arimaha ugu muhiimsan oo mudan la tixgeliyo markii la sameynaya dia u heshiisiinta qaran.